# Sida loo codeeyo




### Maalinta Codeynta ka hor

1. Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan ikhtiyaarada howlgelinta.
2. Daawo fiidyowga howlgelinta kiraystaha. Kiraystayaasha waxaa looga baahan yahay in aay daawadaan ka hor inta aaysan codeyn. Waxaad ka daawan kartaa internetka

   torontohousing.ca/TER ama goobta codeynta.

### Maalinta codeynta

1. Shaqaalaha iska diiwaangeli oo tus aqoonsi sawir leh iyo cadeynta cinwaanka (tus. leysanka darawalnimada, warqad, kaar arday, kaar caafimaad).
2. Ku daawo fiidyowga goobta codeynta haddii aadan hore uga daawan website-keena.
3. Warqadda codeynta daaha dhinaciisa dame ku soo calaamadee, laalaab oo ku rid sanduuqa codeynta
4. Ku soo noqo goobta codeynta marka codeynta xiranto wixii la xiriira tirinta codadka oo dadweynaha u furan iyo ku dhawaaqista ikhtiyaarka degaanka doorbideen ee beeshaada.

# Nala soo xiriir

Waxaad soo wici kartaa taleefan gaar ah ama email u dir haddii aad leedahay su'aalo ama wax kale.

416-981-4435

EngagementRefresh@torontohousing.ca

## Ka-sii-wad xiriirka

torontohousing.ca/TER

TorontoCommunityHousing

@TOHousing

@torontohousing

Si aad ugu codsato dokumentigan qaab la heli karo ama iyoadoo turjuman, fadlan la xiriir **help@torontohousing.ca** ama wac **416-981-5500**.

Copyright © 2019 Toronto Community Housing

Toronto Community Housing



# Hagaha Cod-bixiyaha Ikhtiyaarka Howlgelinta Degaanka ee Habka Howlgelinta Kiraystaha

Isku diyaari in aad siiso codkaaga ikhtiyaarka sida ugu fiican ugu jaan-go'an beeshaada.

# Ikhtiyaarkeed ayaad dooran doontaa?

Ka-qeyb galka Habka Howlgelinta Kiraystaha La-cusbooneysiiyey wuxuu u ogolaan doonaa beeshaada in aay ku howlanaadaan go'aan gaarista degaanka. Kiraystayaasha waxay awood u yeelan doonaan in aay wax ka qabtaan muhimadaha degaanka, iyo codkooda in la ga maqlo beesha dhexdeeda. Kiraystayaasha waxay u codeyn doonaan ikhtiyaarka howlgelinta ee sida ugu fiican ugu jaan-go'an beeshooda. Waxaa jira afar ikhtiyaar:

## Wakiilo Beeleed

### Qeyb ka mid ah Habka Howlgelinta Kiraystaha



250 kii reerba labo wakiil ayeey dooranayaan: Xubnaha la-doortay waxay:

- La shaqeynayaan Toronto Community Housing iyo lamaanyaasheeda si wax looga qabto muhimadaha beesha
- Hirgelinayaan oo la soconayaan Qorshaha Waxqabadka Beesha
- Ku matalayaan beeshooda Miiska Waxqabadka Kiraystaha

## Guddi dhisme/Townhouse

### Qeyb ka mid Habka Howlgelinta Kiraystaha



Kiraystayaasha oo dhan wuu u furan yahay.

**Guddi walba wuxuu:**

- La shaqeynayaa Toronoto Community Housing iyo lamaanayaasheeda si wax looga qabto muhimadaha beesha
- Hirgelinayaa oo la soconayaa Qorshaha Waxqabadka Beesha
- Xulayaa labo xubnood si aay ugu matalaan beeshooda Miiska Waxqabdka Beesha

## Xiriir Kirayste

### Ka-madax-banaan



Ka-madax-banaanToronto Community Housing.

**Xiriir Walbo:**

- Waa koox xubno madax-banaan leh
- Waxay dooran karaan in aay sameystaan Xiriir Kirayste iyadoo aay intaa u dheer tahay, in aay ku howlanaadaan Habka Howlgelinta Kiraystaha la-cusbooneysiiyey
- Wakiil beeleed kuma laha Miiska WaxqabadkaKiraystaha

## Wakiil La'aan

### Ka-madax-banaan



Kiraystayaasha kuma lahaan doonaan wakiil beeleed Habka Howlgelinta Kiraystaha ee la-cusbooneysiiyey.

**Wakiil La'aan macnaheedu waa:**

- go'aan gaaridda degaanka ma jirayso cid mataleysa
- beesha ma laha awood aay ku hirgeliyaan kulana socdaan qorshahooda waxqabad
- ma jirayso cid ku matalaysa beesha Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha

La hadal Isku-duwaha Adeegyada Beesha ee howlgelinta degaanka, booqo **torontohousing.ca/TER**, email u dir **EngagementRefresh@torontohousing.ca** ama wac **416-981-4435** wixii war dheeraad ee ku saabsan sida aad u codeyn karto ama ugu howlanaan karto.